<b>Bad</b> n -/ä-er qabeys(ka),	<b>bald</b> adv. dhawaan,
musqul(sha),	mardhaw, degdeg,
xamaam(ka), suuli(ga)	markiiba
<b>Badeanzug</b> m dhar(ka)	<b>Balkon</b> m -/s
qabeys(ka), dharka	barxad(da), deed(ka),
maydhasho(da)	jalbeeb(ka)
<b>baden</b> vt, vi qabeysan,	<b>Ball</b> m -/ä-e kubbad(da),
maydhan	banooni(ga)
<b>Badewanne</b> f	<b>Ballspiel</b> n -/e kubbad
berkad(da), qabeysi(ga)	ciyaarid(da)
<b>Bahn</b> f -/en tareen(ka)	<b>Banane</b> f -/n muus(ka)
<b>Bahnhof</b> m maxadadda	<b>Band</b> n -/ä-er
tareen(ka)	cajalad(da), koox(da), xadhig(ga)
<b>Bahnsteig</b> m -/e	<b>Bank</b> f -/ä-e/en
maxadad(da) tareen(ka)	bangi(ga), fadhi(ga), foom(ka)



<b>Bankkonto</b> n -/s	<b>Basketball</b> m kubad(da)
koonto(ada),	koley(ga)
xisaabbangi(ga)	
<b>Banknote</b> f -/n lacag(ta)	<b>Batallion</b> n -/e guuto(da)
warqadda ah	<b>Batterie</b> f -/n bateri(ga), dhagax(da)
<b>bar</b> adj. cadaan ah	<b>Bau</b> m -/e disme(ha)
<b>Bar</b> f -/en baar(ka),	<b>Bauart</b> f -/en
makhaayad(da)	habdismeed(ka)
<b>barfuss</b> adj. cagocadaan,	<b>Bauch</b> m -/ä-e
kabo la'aan	calool(sha)
<b>Bargeld</b> n lacg(ta)	<b>Baudenkmal</b> n -/s
cadaan(ka)	dhismo xusuuseed(ka), taallo(da)
<b>barmherzig</b> adj.	<b>bauen</b> vt dhisid, yagleelid, ku beerid, beerid
naxariis leh, raxmad leh	
<b>Barmherzigkeit</b> f	<b>Bauer</b> m -/n
naxariis(ta), raxmad(da)	beerqote(ha)), beeroole(ha)
<b>Bart</b> m -/ä-e gadh(ka)	<b>Bäuerin</b> f -/nen
<b>Barzahlung</b> f	beeraley(da), beerqodato(da)
dhiibid(da) lacag cadaan	
ah, bixin(ta)	
<b>Basis</b> f aassaas(ka),	
sal(ka), gun(ta)	

<b>Baum</b> m -/ä-e geed(ka)	<b>beantragen</b> vt codsan,
<b>Baumwolle</b> f cudbi(ga), suuf(ka)	dalban
<b>Baustelle</b> f -/n meeldismeed(ka), dhisme(ha)	<b>beantworten</b> vt ka jawaabid, weydiin celin
<b>beabsichtigen</b> vt rabid, doonid	<b>Beantwortung</b> f -/en ka jawaabid(da)
<b>beachten</b> vt ixtiraamid, ka digtoonaan, digtoonid	<b>beaufsichtigen</b> vt ilaalin, eegid
<b>Beachtung</b> f ka digtoonaan(ta), ixtiraamid(da), digtoonid(da)	<b>Beaufsichtigung</b> f -/en ilaalin(ta), eegid(da)
<b>Beamter</b> m shaqaale(ha) dawlad(da)	<b>beauftragen</b> vt xilsaarid, amrid, farid, ka shaqeyn
<b>beängstigen</b> vt cabsiin, ka bajin, naxdin	<b>Beben</b> vi gilgild, gariirid, dayaamid
<b>beanspruchen</b> vt codsan, u doodid, rabid, dalban	<b>Becher</b> m -/s koob(ka)
	<b>bedanken</b> vr u mahadcelin, u mahadniqid
	<b>Bedarf</b> m rabitaan(ka), baahi(da)

<b>bedauern</b> vt ka xumaan, ka xun	<b>bedingungslos</b> adj. shruud la'aan, xujeen
<b>bedauerlich</b> adj. laga xumaado, xumaan	<b>bedrängen</b> vt ku qasbid, ku dirqid, ku dirqiyid
<b>bedecken</b> vt asturid, daboolid, huwin, huwan	<b>bedrohen</b> vt handadid, hanjabid, u cagajugleyn
<b>bedenken</b> vt fikrid, vr ka fikrid	<b>bedrohlich</b> adj. handadaad ah, hanjabaad ah, cagajugleyn ah
<b>bedeuten</b> vi ula jeedid, macneyn, ka wadid	<b>Bedrohung</b> f handadaad(da), hanjabaad(da), cagajugleyn(ta)
<b>bedeutend</b> adj. lagama maarmaan ah, daruuri ah	<b>bedrucken</b> vt ku daabicid
<b>Bedeutung</b> f -/en ula jeedid(da), ka wadid(da), macno(ha)	<b>Bedürfnis</b> n -/se u baahnaan(ta), baahi(da), rabitaan(ka)
<b>bedienen</b> vt u adeegid, isu adeegid, adeegan	<b>beeilen</b> vt dhaqsan, degdegid
<b>Bedienung</b> f -/en adeeg(ga), u shaqeeyn(ta)	
<b>Bedingung</b> f -/en shruudo(ha), xujeyn(ta)	



<b>beeinflussen</b> vt	<b>befahren</b> vi marid,
soojiidan, saameyn	socon
<b>beenden</b> vt dhameyn, dhameystirid	<b>befestigen</b> vt adkeyn, ku dhejin
<b>Beendung</b> f	<b>Befestigung</b> f -/en
dhameyn(ta), dhameystirid(da)	adkeyn(ta), ku dhejin(ta)
<b>beengen</b> vt cidhiidhin, cidhiidh ka dhigid	<b>befeuachten</b> vt ku qoyn, qoyn
<b>beerben</b> vt dhaxlid, ka dhaxlid	<b>befinden</b> vr ku aalid, ku jirid, ku sugnaan
<b>beerdigen</b> vt xabaalid, aasid, duugid	<b>befolgen</b> vt raacid, fulin, sameyn
<b>Beerdigung</b> f -/en	<b>befördern</b> vt u dirid, u dhoofin, dalacsiin
xabaalid(da), aasid(da), duugid(da)	<b>Beförderung</b> f u dirid(da), u dhoofin(ta), dalacsiin(ta)
<b>befehlen</b> vi amirid, ku amrid	<b>befragen</b> vt ka wareysan, vr weydiin
<b>Befehl</b> m -/e amar(ka), farid(da)	<b>befreien</b> vt xoreyn, vr is xoreyn, badbaadin
<b>befahrbar</b> adj. la mari karo	



<b>Befreiung</b> f xoreyn(ta), badbadin(ta)	<b>befugt sein</b> vt u xilsaarnaan, farxad u qabid
<b>befremden</b> vt la ama ka yaabin	<b>Befund</b> m xaqiiq(da), jawaab(ta), helitaan(ka), helis(ta)
<b>befreunden</b> vr la saaxiibid, jaalle la noqon	<b>befürchten</b> vt ka cabsan, ka baqan
<b>befreundet</b> adj. la saaxiib ah, jaalle ah	<b>Befürchtung</b> f -/en ka cabsasho(da), baqasho(da)
<b>befriedigen</b> vt raaligelin	<b>befürworten</b> vt ku raacid, yeelid, taageerid
<b>befriedigend</b> adj. ku raali noqon	<b>Befürwortung</b> f -/en ku raacid(da), yeelid(da), taageerid(da)
<b>Befriedigung</b> f raaligelin(ta), raaliahaan(ta)	<b>begabt</b> adj. hibo leh, maskax furan, maskax wacan, garaad badan
<b>befristen</b> vt xadeyn, mudeyn	<b>Begabung</b> f -/en hibo(da), maskax furaan(ta), garaad(ka)
<b>befruchten</b> vt ku abuurid, ku beerid	
<b>Befugnis</b> n -/se awood u lahaan(ta), farxad u qabid(da)	



<b>Begebenheit</b> f -/en	<b>Begleiter</b> m
dhacdo(da)	weheliye(ha), dhaweeye(ha)
<b>begegnen</b> vt kulmid, la	
kulmid	
<b>Begegnung</b> f -/en	<b>Begleitung</b> f -/en
kulan(ka), kulmitaan(ka)	raacid(da), wehelin(ta), dhaweyn(ta)
<b>begehren</b> vt rabid,	<b>beglücken</b> vt ka farxin,
doonid	ku nasiibin
<b>begeistern</b> vt ka helid, la	<b>beglückwünschen</b> vt u
dhicid	hambalyeyn, u
<b>bießen</b> vt ku shubid	taaniyadeyn
<b>Beginn</b> m bilow(ga),	<b>begnadigen</b> vt cafin, u
bilaabid(da)	dembidhaafid
<b>beginnen</b> vt bilaabid	<b>Begnadigung</b> f
<b>beglaubigen</b> vt cadeyn,	dembidhaaf(ka),
rumeyn	cafin(ta), cafis(ka)
<b>Beglaubigung</b> f -/en	<b>begnügen</b> vr ku filan, la
cadeyn(ta), rumeyn(ta)	ekaa
<b>begleiten</b> vt raacid,	<b>begraben</b> vt xabaalid,
wehelin, dhaweyn	aasid, duugid

<b>begreifen</b> vt fahmid, garan	<b>begünstigen</b> vt u eexan, wanaajin
<b>begreiflich</b> adj. la fahmi karo, la garan karo	<b>Begünstigung</b> f -/en wanaajin(ta), u
<b>begrenzen</b> vt xadeyn, xadidid	<b>begütert</b> adj. taajir ah, tanaad ah, maalqabeen ah
<b>Begriff</b> m -/e macnaha erey(ga), fikrad(da), erey(ga)	<b>behalten</b> vt heysan, ceshan, ku heyn
<b>begründen</b> vt cadeyn, faahfaahin, sabab u yeelid	<b>Behälter</b> m celiye(ha)
<b>Begründung</b> f -/en sabab(ta), sababeyn(ta)	<b>behandeln</b> vt daweyn, isticmaalid
<b>begrüßen</b> vt soodhaweyn, salaamid, qaabilid	<b>Behandlung</b> f -/en daweyn(ta), isticmaal(ka)
<b>Begrüßung</b> f -/en soodhaweyn(ta), qaabilid(da), salaan(ta))	<b>behaupten</b> vt rumeyasan, cadeyn
	<b>Behauptung</b> f -/en rumeynsnaan(ta), cadeyn(ta)



<b>beherrschen</b> vt xoog ku qabsan, aqoon	<b>Behutsamkeit</b> f ilaalin(ta), dhawrid(da), dhawrsanaan(ta)
<b>Beherrschер</b> m amiir(ka)	<b>bei</b> Prop. m Dat. la, ku, u dhaw, ag
<b>beherzigen</b> vt qalbiga ku heyn	<b>beibehalten</b> vt heysan, lahid
<b>beherzt</b> adj. geesi ah	<b>beibringen</b> vt barid, fahamsiin
<b>behindern</b> vt ka celin, ka reebid, ka mamnuucid	<b>beide</b> adv. labada, labo ah, lamaane ah
<b>behindert</b> adj. jiis ah, curyaan ah, qofdhiman ah	<b>Beifall</b> m sacab(ka), sacabin(ta)
<b>Behörde</b> f -/n xilhayeeno(da), idaarad(da), maamul(ka)	<b>beifügen</b> vt ku darid, sooraacin, ku dhejin, ku lifaaqid
<b>behüten</b> vt ilaalin, dhawrid, xafidid	<b>Beihilfe</b> f gargaar(ka), kaalmo(da)
<b>behutsam</b> adj. ilaalsan, dhawran, dhawrsan	<b>Beil</b> n faash(ka), gudin(ta)

<b>beilegen</b> vt raacin, ku lifaaqid	<b>beiseite</b> adv. dhinac, agta, garab
<b>Beileid</b> n tacisi(da), baroor(ta)	<b>beisetzen</b> vt duugid, xabaalid, aasid
<b>beimessen</b> vt ku qiyaasid, ku cabirid	<b>Beispiel</b> n tusaale(ha), masal(ka)
<b>Bein</b> n lug(ta), adin(ka)	<b>beispielhaft</b> adj. tusaale ah, masal ah
<b>beinahe</b> adv. ku sigan, ku dhawaad	<b>beispiellos</b> adj. tusaale laheyn, masal laheyn
<b>Beiname</b> m naaneys(ta)	<b>beispieleweise</b> adv. tusaale ahaan, masal ahaan
<b>beinhalten</b> vt ku jirid, ku raacid, waafiqid	<b>beißen</b> vt qaniinid, goosan
<b>beipflichten</b> vi yeelid, ku raacid, waafiqid	<b>Beistand</b> m gargaar(ka), kaalmo(da), caawimaad(ka)
<b>beisammen</b> adv. wadajir, isla joog	<b>beistehen</b> vt caawin, gargaarid, kaalmeyn
<b>Beisammensein</b> n wadajir(ka), isla joog(ga)	
<b>Beischlaf</b> m wasmo(da), galmo(da), utegid(da)	

<b>beistimmen</b> vt	<b>Bekämpfung</b> f la
gaadhsiin, ku raacid, yeelid	dagaalan(ka), la dirid(da), ka hortaagid(da)
<b>Beitrag</b> m kaalmo(da), caawin(ta)	<b>bekannt</b> adj. caan ah, layaqaan, magac leh, macruuf ah
<b>beitragen</b> vt la sameyn, ka qeybqaadan, gelid	<b>Bekannter</b> m saaxiib(ka), macruuf(ka)
<b>Beitritt</b> m gelid(da), ku biirid(da)	<b>Bekanntmachung</b> f -/en ogeysiis(ka), caan ka dhigid(da)
<b>beiwohnen</b> vi la deganaan, wadadegeen	<b>Bekanntschaft</b> f -/en saaxiibtinimo(da)
<b>beizeiten</b> adv. goor ama aroor hore	<b>bekehren</b> vt hanuunin, ka raaridid
<b>bejahen</b> vt yeelid, ogolaan, ku raacid	<b>Bekehrung</b> f -/en hanuunin(ta), ka raaridid(da)
<b>bejaht</b> adj. duq ah, da' ah	
<b>Bejahung</b> f -/en yeelid(da), ogolaan(ta)	
<b>bekämpfen</b> vt la dagaalamid, la diririd, ka hortaagid	

<b>bekennen</b> vt qiran, yeelid	<b>beknien</b> vt jilbo qabsan, baryid, tuugid, u sijuuidid, jilbojoogsan
<b>Bekenntnis</b> n -/se qirasho(da), yeelid(da), qiraal(ka)	<b>bekommen</b> vt helid, haysan
<b>beklagen</b> vt eedeyn, vr ka caban, ka eedsheegan, ka calaacalid	<b>bekömmlich</b> adj. caafimaad leh, waanaagsan, dhadhan leh
<b>Beklagter</b> m eedeysane(ha), dacweysane(ha)	<b>bekräften</b> vt xoojin, adkeyn
<b>beklatschen</b> vt u sacabin, sacabeyn	<b>Bekräftigung</b> f xoojin(ta), adkeyn(ta)
<b>bekleben</b> vt ku dhejin, dhejin	<b>beladen</b> vt rarid, dulsaarid
<b>Bekleidung</b> f dhar(ka), lebis(ka), hu'(ga)	<b>belasten</b> vt cusleyn, culeys saarid, culeys dhafin
<b>bekleiden</b> vt dharxidhan, dhargashan, labisan	<b>belästigen</b> vt dhibid, qashqashid



<b>Belästigung</b> f -/en	beliebt adj. caan ah, la
dhib(ka), qashqash(ka)	jecelyahay
<b>Belastung</b> f -/en	<b>belohnen</b> vt abaalmarin,
culeys(ka), dhib(ta)	abaalgudid, abaal
<b>belegen</b> vt buuxin,	ugelid
cadeyn	
<b>belehren</b> vt barid, tusid	<b>Belohnung</b> f -/en
	abaalmarin(ta),
<b>Belehrung</b> f -/en	abaalgudid(da),
barid(da), tusid(da)	abaal ugelist(da)
<b>beleidigen</b> vt caayin,	<b>belügen</b> vt been u
aflagaadeyn, ceebeyn	sheegid, beeneyn
<b>Beleidigung</b> f -/en	<b>belustigen</b> vt
cay(da), aflagaado(da),	maaweelin, ka qoslin, ka
ceebayn(ta)	farxin
<b>beleuchten</b> vt ifin,	<b>bemerkbar</b> adj. la
iftiimin, nuurin	dareemi karaa, dareen
<b>Beleuchtung</b> f -/en	leh
iftiimin(ta), nuurin(ta),	<b>bemerken</b> vt dareemid
iftiin(ka)	<b>Bemerkung</b> f -/en
<b>beliebig</b> adj. aan	dareen(ka),
doorsoomin, mid uun ah	dareemid(da)

<b>bemitleiden</b> vt la xumaan, ka xumid	<b>Benachteiligung</b> f -/en yasid(da),
<b>bemühen</b> vt ku dhiirin, ku dadaalid, isku taxalujin	quudhsasho(da), ka eexasho(da)
<b>Bemühung</b> f -/en dhiirin(ta), dadaal(ka), ku dadaalid(da)	<b>benehmen</b> vr ku dhaqmid
<b>benachbart</b> adj. la daris ah, la degan	<b>Benehmen</b> n -/s dhaqan(ka), anshax(a)
<b>benachrichtigen</b> vt u sheegid, u waramid, ogeysiin, wargelin	<b>beneiden</b> vt xaasidid, ka maseyrid, maseyrid
<b>Benachrichtigung</b> f -/en war(ka), u sheegid(da), ogeysiis(ka), wargelin(ta)	<b>bennen</b> vt ku magacaabid, ugu yeedhid
<b>benachteiligen</b> vt yasid, quudhsan, ka eexan	<b>benommen</b> adj. wareersan, suuxsan, miyir laheyn
	<b>Benommenheit</b> f suuxdin(ta), miyir la'aan(ta)

<b>benötigen</b> vt u baahan, rabid	<b>Beraterin</b> f-/nen lataliso(da)
<b>benutzen</b> vt isticmaalid	<b>Beratung</b> f -/en
<b>Benutzung</b> f  isticmaal(ka), isticmaalid(da)	latalin(ta)
<b>Benzin</b> n batrool(ka)	<b>berauben</b> vt dhicid, xadic, boobid
<b>beobachten</b> vt fiirin, eegid, indhoindheyn, ukuurgelid, ilaalin	<b>Beraubung</b> f dhac(a), xatooyo(da), boobid(da)
<b>Beobachtung</b> f -/en  indhoindheyn(ta), laalin(ta), u kuurgelid(da)	<b>berechnen</b> vt xisaabin  <b>Berechnung</b> f xisaabin(ta)
<b>bepflanzen</b> vt ku beerid, ku abuurid	<b>berechtigen</b> vt u dhigmid, xaq u yeelan, jid u lahaan
<b>bequem</b> adj. raaxo leh	<b>Berechtigung</b> f -/en u dhigmid(da), xaq u lahaan(ta)
<b>Bequemlichkeit</b> f -/en raaxo(da)	<b>bereden</b> vt ka hadlid, sheegid
<b>beraten</b> vt latalin, ka waanin	<b>Bereich</b> m -/e laan(ta), dhinac(a), xag(ga)
<b>Berater</b> m lataliye(ha)	

<b>bereinigen</b> vt xalilid, sifeyn, dejin	<b>berücksichtigen</b> vt tixgelin, qiimeyn
<b>bereisen</b> vt safrid, dhoofid, socdaalid	<b>Berücksichtigung</b> f tixgelin(ta), qiimeyn(ta)
<b>bereit</b> adj. diyaar ah	<b>Beruf</b> m -/e shaqo(da), xirfad(da), farsamo(da)
<b>bereits</b> adv. marhore, goorhore	<b>berufen</b> vt u magacaabid, u igman, u igmid
<b>bereuen</b> vt qoomameyn, ka shanleyn, ka walaacin	<b>beruflich</b> adj. shaqo leh, xirfad leh, farsamo leh
<b>Berg</b> m -/e buur(ta)	<b>Berufsausbildung</b> f tababar(ka) shaqada, shaqobarad(ka), farsamobaran(ta)
<b>bergig</b> adj. buuraley ah	<b>berufstätig</b> adj. shaqaale ah, xoogsade ah
<b>Bericht</b> m -/e war(ka), warbixin(ta), askhabaar(ta)	<b>Berufung</b> f -/en u magacaabid(da), magacaabis(ta)
<b>berichten</b> vt warbixin, ka waramid, ka sheekeyn	<b>beruhigen</b> vt dejin, vr isdejin, isqaboojin
<b>berichtigen</b> vt sixid, hagaajin, wanaajin	
<b>Berichtigung</b> f -/en sixid(da), hagaajin(ta)	

<b>Beruhigung</b> f dejin(ta), qaboojin(ta)	<b>Beschädigung</b> f -/en dhaawac(a), waxyeelo(da), waxyeelid(da)
<b>berühmt</b> adj. caan ah, macruuf ah, magac leh	
<b>berühren</b> vt taaban, qabsan	<b>beschaffen</b> vt keenid, sooiibin, soogadid
<b>Berührung</b> f -/en taabasho(da), qabsasho(da)	<b>beschäftigen</b> vt howlgelin, vr howlheyn, ku mashquulsanid, ku masquulid
<b>besagen</b> vi sheegid, dhihid	<b>Beschäftigung</b> f -/en shaqo(ada), howl(sha)
<b>besänftigen</b> vt dejin	<b>beschämen</b> vt xishoon, ka xishoon
<b>Besänftigung</b> f dejin(ta)	
<b>Besatzung</b> f kooxda markaakiib(ta)	<b>Bescheid</b> m -/e jawaab(ta), go'aan(ka)
<b>besaufen</b> vr sakhraamid, khamri ka dhergid, khamri cabbid	<b>bescheiden</b> adj. qanacsan, hanyar
<b>beschädigen</b> vt dhaawicid, waxyeeleyn, waxyeelid	<b>Bescheidenheit</b> f qancid(da), hanyarid(da)
	<b>bescheinigen</b> vt cadeyn, rumeyn

<b>Bescheinigung</b> f -/en	<b>beschmutzen</b> vt
cadeyn(ta), rumeyn(ta)	ceebeyn, caayin
<b>beschimpfen</b> vt caayin, aflagaadeyn, ceebeyn	<b>beschneiden</b> vt gudid, xalaaleyn
<b>Beschimpfung</b> f -/en	<b>Beschneidung</b> f -/en
cay(da), aflagaadeyn(ta), ceebeyn(ta)	gudid(da), xalaaleyn(ta)
<b>beschlagen</b> vt garaacid, tumid, diliid	<b>beschränken</b> vt xadeyn, koobid
<b>Beschlagnahme</b> f -/n la	<b>Beschränkung</b> f -/en
wareegid(da), ka qaadid(da)	xadeyn(ta), koobid(da)
<b>beschlagnahmen</b> vt la	<b>beschreiben</b> vt
wareegid, ka qaadid	tilmaamid, sifeyn
<b>beschleunigen</b> vt	<b>Beschreibung</b> f -/en
dedejin, xowli dheereyn	tilmaan(ta), sifeyn(ta)
<b>Beschleunigung</b> f -/en	<b>beschuldigen</b> vt eedeyn, ku eedeyn
dedejin(ta), xowli dheereyn(ta)	<b>Beschuldigung</b> f
<b>beschließen</b> vt goosan, go'aansan, gaadhid	eedeyn(ta), ku eedeyn(ta)
<b>Beschluss</b> m go'aan(ka)	<b>beschützen</b> vt ilaalin, dhawrid, difaacid

<b>Beschwerde</b> f -/n	eed(da), dacwad(da), ashkateyn(ta)	<b>besichtigen</b> vt daawan, booqan, soofirin
<b>beschwerden</b> vr	isdacweyn, isashkateyn	<b>Besichtigung</b> f -/en
<b>beschweren</b> vt	cusleyn, dhibid, vr iseedeyn	booqasho(da), daawasho(ada)
<b>beschwindeln</b> vt	khayaamid, beensheegid	<b>besiedeln</b> vt dejin, degin
<b>beschwören</b> vt	ku dhaaran, dhaaran	<b>Besiedlung</b> f dejin(ta), degin(ta)
<b>beseitigen</b> vt	dheereyn, fogeyn	<b>besiegen</b> vt ka
<b>Besen</b> m	xaaqin(ka), mafiiq(da)	guuleysan, ka libinhelid
<b>besetzen</b> vt	qabsan, la wereegid	<b>Besitz</b> m lahaan(ta), hanti(da), heysasho(da)
<b>Besetzung</b> f -/en	qabsasho(da), la wareeg(ga)	<b>besitzen</b> vt lahaan, haysan
<b>besetzt</b> adj.	ma banaana, la fadhiyo	<b>Besitzer</b> m qabe(ha), lahe(ha), hantiye(ha), hantiile(ha)
		<b>Besoffene</b> adj. sakhraan ah, cabsan
		<b>besonder (er/es)</b> adj. gaarahaan

<b>Besonderheit</b> f -/en	<b>Besserung</b> f ladnaan(ta), wanaajin(ta), fiicnaan(ta)
gaarahaan(ta)	
<b>besorgen</b> vi keenid, sooiibin, helid	
<b>Besorgnis</b> f welwel(ka), murugo(da), ciil(ka)	<b>Bestand</b> m jiritaan(ka), aasaas(ka)
<b>besorgt</b> adj welwelsan. Murugeysan, walaacsan	<b>beständig</b> adj. joogto ah, dhamaad laheyn
<b>Besorgung</b> f -/en	<b>Beständigkeit</b> f
keenid(da), sooiibsasho(da)	joogteyn(ta)
<b>besprechen</b> vt ka hadlid, ka wadahadlid	<b>Bestandteil</b> m -/e qeyb(ta)
<b>Besprechung</b> f -/en ka hadlid(da), ka wadahadlid(da)	<b>bestärken</b> vt xoojin, dhiirigelin
<b>besser</b> adj. adv. fiican, ka fiican, wacan, wanaagsan	<b>bestätigen</b> vi cadayn, qirid
<b>bessern</b> vt fiicneyn, wanaajin, wanaagsan, hagaajin	<b>Bestätigung</b> f -/en cadeyn(ta), qirid(da)
	<b>bestatten</b> vt duugid, xabaalid, aasid

<b>Bestattung</b> f -/en	<b>Bestellung</b> f dalab(ka), codi(ga)
duugid(da), xabaalid(da), aasid(da)	<b>Bestie</b> f -/n dugaag(ga), waxash(ka)
<b>bestechen</b> vt laaluushid, musqmaasuqid	<b>bestimmen</b> vt go'yn, sugid
<b>Bestechung</b> f -/en	<b>bestimmt</b> adj. sugar, go'an
laaluushid(da), laaluush(ka), musuqmaasuq(a)	<b>Bestimmung</b> f go'yn(ta), sugid(da), go'aan(ka)
<b>Besteck</b> n -/e	<b>bestrafen</b> vt ciqaabid, ganaaxid
maacuun(ta)	<b>Bestrafung</b> f -/en ciqaabid(da), ciqaab(ta), ganaax(a)
<b>bestehen</b> vt guuleysan, ku gudbid, vi dhisnaan, jirid, taagnaan	<b>bestreben</b> vr isku taxalujin, ku dadaalid
<b>bestehlen</b> vt xadid, ka xadid	<b>bestreiten</b> vt ku dagaalid, murmid
<b>besteigen</b> vt korid, fuulid	
<b>bestellen</b> vt dalban, codsan	

<b>Besuch</b> n -/e	<b>beten</b> vt tukan, duceysan
boqashao(da),	<b>beteuern</b> vt xaqijjin,
siyaaro(da)	xoojin
<b>besuchen</b> v booqan,	<b>Beton</b> m sibidh(ka),
siyaaran	jaajuur(ka)
<b>Besucher</b> m booqde(ha),	<b>betonen</b> vt ku
martiye(ha), siyaarte(ha)	dhawaaqid, dhihid,
<b>betagt</b> adj. duq ah, da'ah	sheegid
<b>betätigen</b> vt ka	<b>Betonung</b> f ku
shaqeysiin, hawlgelin,	dhawaaqid(da), ku
vr ishowlgelin	adkeyn(ta),
<b>betäuben</b> vt suuxin,	<b>betrachten</b> vt fiirin,
suuxdin, miyirbeelid	eegid
<b>Betäubung</b> f -/en	<b>beträchtlich</b> adj. aad u
suuxin(ta), suuxdin(ta),	weyn
miyirbeel(ka)	<b>Betrachtung</b> f -/en
<b>beteiligen</b> vt ka	fiirin(ta), eegid(da)
qeybgelid, ka qeyqaadan	<b>Betrag</b> m -/ä-e
<b>Beteiligung</b> f -/en ka	xisaab(ta)
qeybgelid(da), ka	<b>treffen</b> vt ku saabsan,
qeybgal(ka),	khuseyn
ka qaybqaadansho(da)	

<b>betreten</b> vt dhexgelid, gudagelid, ka xaajoon	<b>beugen</b> vt foorarsan, rukuucsan, rukuucid
<b>Betrieb</b> m -/e  warshad(da)	<b>Beule</b> f -/n barar(ka), nabar(ka)
<b>Betrübnis</b> f  qoomamo(da), murug(ga), murugo(da)	<b>beunruhigen</b> vt degnaan la'aan, welwelsan, vr ka welwelsan
<b>Betrug</b> m -/ü-e  khayaamo(da), dhagar(ta)	<b>beurteilen</b> vt u maleyn, ku xukumid, u qiyaasid
<b>betrügen</b> vt, vi  khaa'imid, dhagrid	<b>Beute</b> f -/n booli(ga), xaaraan(ta)
<b>Betrüger</b> m khaa'in(ka), tuug(ga)	<b>Beutel</b> m kiish(ka)  bac(da)
<b>betrunken</b> adj. cabsan, sakhraansan	<b>Bevölkerung</b> f -/en dad(ka), shicib(ka), dadweyne(ha)
<b>Bett</b> n -/en sariir(ta)	<b>bevor</b> Konj. kahor, inta
<b>Bettler</b> m tuugsade(ha), dawarsade(ha), miskiin(ka), barye(ha)	<b>bevorstehen</b> vt  hortaagan, horjooga
	<b>bevorzugen</b> vt u eexan, ka jeclaan, ka dooran, soohormarin

<b>bewachen</b> vt ilaalin, dhawrid, eegid	<b>beweinen</b> vt ooyid, ilmeyn
<b>Bewachung</b> f ilaalin(ta), dhawrid(da), eegid(da)	<b>Beweis</b> m cadeyn(ta), qeexid(da)
<b>bewaffnen</b> vt hubeyn, hub sidan	<b>beweisen</b> vt cadeyn, qeexin, qeexid
<b>bewahren</b> vt ilaalin, xafidid, dhawrid	<b>beweisbar</b> adj. cadeyn ah, la cadeyn karaa
<b>bewahrheiten</b> vr run ka dhigid, run u egeysiin	<b>bewerben</b> vr codsan, dalban
<b>bewältigen</b> vt ku ama ka guuleysan	<b>Bewerbung</b> f -/en codsi(ga) shaqada, dalab(ka)
<b>bewässern</b> vt waraabin, biyosiin	<b>Bewerbungsunterlagen</b> f -/en warqadaha codsi(ga), shaqocodsi(ga)
<b>Bewässerung</b> f -/en waraabin(ta), biyosiin(ta)	<b>bewerten</b> vt qiimeyn, qiyaasid
<b>bewegen</b> vt huunsan, dhaqdhaqaaqid	<b>bewilligen</b> vt ogolaan, idmid
<b>Bewegung</b> f-/en dhaqdhaqaaq(a), huunsi(ga)	



<b>Bewilligung</b> f -/en	<b>Bewusstlosigkeit</b> f miyir
ogolaan(ta),	la'aan(ta), suuxdin(ta),
ogolaansho(ha),	suuxsanaan(ta), ogaal
idmid(da)	la'aan(ta)
<b>bewohnbar</b> adj. degaan	<b>Bewusstsein</b> n
leh, la degi karaa	miyir(ka), garaad(ka),
<b>bewohnen</b> vt deganaan,	garasho(da)
degen, u noolaan	
<b>Bewohner</b> m ku	<b>bezahlen</b> vt bixin,
noole(ha), degene(ha)	dhiibid
<b>bewundern</b> vt la yaabid,	<b>Bezahlung</b> f bixin(ta),
la tacajabid, la fajicid	dhiibid(da)
<b>Bewunderung</b> f	<b>bezaubern</b> vt sixrid
layaab(ka), tacajib(ka),	
la fajac(a)	<b>bezeichnen</b> vt ku
<b>bewusst</b> adj. ujeedo ah,	tilmaamid
ogaan ah, garasho ah	
<b>bewusstlos</b> adj. miyir	<b>bezeugen</b> vt cadeyn,
la'aan, suuxsan,	qirid
ogaal la'aan	
	<b>beziehen</b> vt ka siibid, la
	xidhiidhid, ku saabsan
	<b>Beziehung</b> f -/en
	xidhiidh(ka),
	saaxiibnimo(da)



<b>Bezirk</b> m degmo(ada), xaafad(da)	<b>bilden</b> vt barid, sameyn, dhicid
<b>bezwecken</b> vt ula jeedid', u qasdid	<b>Bildung</b> f -/en waxbarasho(da), dhismo(ha), sameyn(ta)
<b>bezweifeln</b> vt ka shakin, ka shikiyid	<b>Billard</b> n -/e bilyaard(da)
<b>Bibel</b> -/n bibal(ka), kitaab(ka) masiixiga	<b>billig</b> adj. jaban, rakhii ah, qiima yar, qiima jaban
<b>Bibliothek</b> f -/en maktab(ka) buugaagta	<b>billigen</b> vt ogolaan, idmid
<b>biegen</b> vt qaloocin, leexin	<b>Billigung</b> f ogolaan(ta), ogolaansho(ha), idmid(da)
<b>biegsam</b> adj. qaloocsan, leexsan	<b>bin</b> Pers. Pron. ani, aniga
<b>Biene</b> f -/n shini(da)	<b>binden</b> vt xidhid, guntid
<b>Bier</b> n biir(ka)	<b>Binnenhandel</b> m ganacsi(ga) gudaha
<b>bieten</b> vt baryid, siin	<b>Biographie</b> f -/n soojira(ga), taariikh(da)
<b>Bilanz</b> f -/en miisaaniyad(da), dheeltir(ka)	
<b>Bild</b> n -/er sawir(ka), musawir(ka)	

<b>Biologie</b> f -/n	<b>Blick</b> m -/e arag(a), bidhaan(ta), ilmidhiqsi(ga)
baayooloji(ga)	
<b>bis</b> Prop. ilaa, intaa	<b>blicken</b> vi fiirin, bidhaansan, eegid
<b>Bischof</b> m shiikha	
kiristaan(ka)	<b>blind</b> adj. indhoole ah
<b>bisher</b> adv. ilaa hadda, ilaa imika	<b>Blindheit</b> f indho
<b>Biss</b> m qaniinyo(da)	la'aan(ta)
<b>bisschen</b> adv. waxyar, in yar	<b>Blitz</b> m -/e hilaac(a), danab(ka)
<b>bist</b> Pron. adiga, adi	<b>blockieren</b> vt isku
<b>Bitte</b> f -/n baryid(da), codsi(ga), dalab(ka)	aadin, isku goyn, xidhid
<b>bitten</b> vi, baryid, codsan	<b>blöde</b> adj. doqon ah, dabaal ah, nacas ah
<b>bitter</b> adj. qadhaadh ah	
<b>blass</b> adj. ilxun, waji beddelan	<b>Blödsinn</b> m been(ta), khuraafaad(ka)
<b>Blatt</b> n -/ä-er caleen(ta)	
<b>blau</b> adj. buluug ah	<b>blödsinnig</b> adj. been ah, khuraafaad ah
<b>bleiben</b> vi joogid, degan	<b>Blond</b> adj. timo cad leh
<b>Bleistift</b> m -/e	
qalinqori(ga)	<b>bloß</b> adj. qaawan, adv. keli ah

<b>blühen</b> vi magoolid, ubaxeysan, ubaxeyn	<b>Boot</b> n -/e doon(ta)
<b>Blume</b> f -/n ubax(a)	<b>borgen</b> vt deyman. amaahan
<b>Bluse</b> f -/n shaad(ka) nagaha, shaadhdumar(ka), shaadnaagood(ka)	<b>Böse</b> f /n shaydaan(ka), jin(ka)
<b>Blumenstrauß</b> m ubax(a)	<b>böse</b> adj. cadhaysan, xanaaqsan
<b>Blut</b> f -/ü-e dhiig(ga)	<b>Botschaft</b> f -/en safaarad(da), war(ka)
<b>Blüte</b> f -/n ubax(a), magoolid(da), magool(ka)	<b>Botschaftler</b> m safiir(ka), danjire(ha), ergay(ga), qunsul(ka)
<b>Boden</b> n dhul(ka), ciid(da)	<b>boxen</b> vt feedhtamid
<b>Bogen</b> m qaanso(da)	<b>Boxer</b> m feedhyahan(ka), feedhtame(ha)
<b>Bohne</b> f digir(ta)	<b>Boxkampf</b> m
<b>bohren</b> vt daloolin	feedhtan(ka)
<b>Bohrer</b> m dalooliye(ha)	<b>boykottieren</b> vt
<b>Bombe</b> f -/n bom(ka), qumbulad(da)	qaadicid, diidid
<b>Bonbon</b> n -/s nacnac(a)	<b>Brand</b> n -/ä-e gubasho(da), gubid(da)



<b>braten</b> vt shiid, dubbid	<b>breit</b> adj. diyaar ah, balaadhan
<b>Brauch</b> m -/ä-e  ubaani(da), muxtaaj(ka), u baahasho(da)	<b>Breite</b> f -/n balaadh(ka), balac(a)
<b>brauchbar</b> adj.  isticmaal leh, u baahan	<b>Bremse</b> f -/n biriig(ga), joojiye(ha)
<b>brauchen</b> vt rabid,  ubaahnaan	<b>bremsen</b> vt joojin, biiringga u qaban, hakin
<b>Braue</b> f -/n baar(ka),  suniyo(ha)	<b>brennbar</b> adj. guban  kara, holci kara
<b>Braun</b> adj. ciid ah,  maariin ah	<b>brennen</b> vi gubid, vr  guban
<b>Braut</b> f -/ä-e  aroosad(da), Caruusad(da)	<b>Brennholz</b> n xaabo(da), qoryo(ha)
<b>Brautgabe</b> f -/n f  meher(ka)	<b>Brief</b> m -/e  dhambaal(ka), warqad(da)
<b>brav</b> adj. fariid ah,  fiican, dhiiiran, gees ah	<b>Briefmarke</b> f -/n  tigidh(ka) warqadaha
<b>brechen</b> vt jebin, vi  jabid	<b>Briefträger</b> m  warqadqaade(ha), boostaale(ha)

<b>Briefumschlag</b> m -/ä-e	<b>Buch</b> n -/ü-er buug(ga),
gal(ka) warqad(da)	kutub(ka)
<b>Brille</b> f -/n	<b>Buchdruckerei</b> f -/en
muraayad(da) indhaha	madabacad(da)
<b>bringen</b> vt keenid	<b>Bücherei</b> f -/en
<b>Brot</b> n -/e roodhi(da),	maktabad(da)
furin(ka), rooti(da)	<b>Buchhaltung</b> f
<b>Brötchen</b> n roodhi(da),	xisaabaad(ka),
furin(ka)	qorsheyn(ta)
<b>Bruch</b> m -/ü-e jab(ka),	<b>Buchstabe</b> m -/n
baaba'(a)	xaraf(ka)
<b>Brücke</b> f -/n	<b>buchstabieren</b> vt
kaabbad(da), buundo(da)	higaadin
<b>Bruder</b> m -/ü walaal(ka)	<b>Buckel</b> m tuur(ta)
<b>Brunnen</b> m ceel(ka)	<b>bügeln</b> vt kaawadeen,
<b>Brust</b> f --/ü-e naas(ka),	feereyn
laab(ta), xabbad(ka)	<b>Bühne</b> f -/n masrax(a)
<b>Brutto</b> n mushar(ka)	<b>Bühnenstück</b> n
dhan	riwaayad(da)
<b>Bube</b> m -/n wiil(ka),	<b>Bulle</b> f -/n dhufaan(ka),
inan(ka)	dibi(ga)

<b>Bund</b> m -/ü-e	<b>Büro</b> n -/s xafiis(ka)
midow(ga), urur(ka)	
<b>Bündnis</b> n-/se	<b>Bursche</b> m -/n wiil(ka), inan(ka)
midow(ga), urur(ka)	
<b>Bundesbürger</b> m	<b>Bürste</b> f -/n burush(ka), caday(ga)
jarmal(ka)	
<b>Bundesbürgerin</b> f -/nen	<b>Bus</b> m -/ü-se bas(ka)
jarmalad(da)	
<b>bunt</b> adj. midho leh	<b>Busch</b> m -/ü-e duur(ka), jiq(da), keyn(ta), hawd(ka)
<b>Bürger</b> m wadani(ga)	
<b>Bürgerin</b> f -/nen	<b>Busen</b> m naaso(ha)
wadaniyad(da)	
<b>Bürgerkrieg</b> m	<b>Butter</b> f subag(ga), burcad(ka), dufan(ka)
dagaal(ka) sokeeye	
<b>Bürgermeister</b> m	
duq(a) magaalada, madax(a) magaalo(da)	



# C

**Café** n -/s

makhaayad(da),  
kafey(ga), qaxwo(ha)

**Chance** f -/n fursad(da),  
nasiib(ka)

**Chaos** n nidaam

la'aan(ta), rabshad(da),  
isku dhexdaadsanaan(ta)

**Charakter** m -/e

dabci(ga), qaab(ka),  
hannaan(ka)

**charakterlos** adj. dabci  
la'aan, qaab la'aan,  
sharaf la'aan

**Charakterlosigkeit** f

dabci la''aan(ta),  
qaab la'aan(ta)

**charakterisieren** vt  
tilmaamid, sifeyn

**charmant** adj. wacan,

wanaagsan, fiican

**chatten** v baadis,  
baadhid

**Chauffeur** m -/e

wade(ha), kaxeeye(ha)

**Chef** m -/s madax(a),  
maamule(ha),  
mas'uul(ka)

**Chefin** f-/nen  
maamulad(da)

**Chemie** f kimiko(da)

**Chirugie** f -/n  
qaliin(ka), qalid(da),  
qalintaan(ka)

**Chor** m -/ö-e koox(da),  
fanaaniin(ta)

**Christ** m -/en  
masiixi(ga)

**Christentum** n -/s

masiixiyad(da)

**Cousin** m -/s

inaadeer(ka)),

inaabti(ga)

**Cousine** f -/e

inaadeer(ta), inaabiti(da)

**Creme** f -/s dufan(ka)

jidh(ka), kiriim(ka)

# D

**da** adv. halkan, halkaa,

adv. waayo

**dabei** adv. la soccon, ku

jiris

**dabei haben** vi haysan,

hantiyid

**dabei sein** vi, joogid, ka

qeybgelid

**dabei stehen** vi la

joogid ama socon

**Dach** n -/ä-e saqaf(ka),

safiito(da)

**dadurch** adv. sidaas

daraadeed, sidaas

darteed, sidaa awgeed

**dafür** adv. taasi, sidaas

**dafürhalten** vt u

heysan, u maleyn

**dafür sein** vi

raacsanaan, yeelid



<b>dagegen</b> adv. kasoo horjeed, lid, diidan, lid ku ah	<b>Dame</b> f -/n marwo(da), haween(ka)
<b>dagegen halten</b> vt ka horkeenid, ka horiman	<b>damit</b> adj. taasi, midkaas, halkaas
<b>dagegen sein</b> vi ka horjeedid, diidanaan, diidan	<b>dämlich</b> adj. doqon ah, dabaal ah, nacas ah
<b>Daheim</b> n -/e guri(ga), aqal(ka), hoy(g)	<b>Dampf</b> m uumi(ga), qiiq(a), qaac(a)
<b>daher</b> adv. sidaas darteed, halkaas, sidaa daraadeed	<b>dampfen</b> vi qaacin, qiiqid
<b>dahin</b> Prop. halkaas, goobtaas, meeshaas	<b>Dampfer</b> m -/ä-e markab(ka)
<b>dahinten</b> adv. gadaal, halkaa gadaal, halka dambe	<b>danach</b> adv. dabadeed, ka dib, ka bacdi
<b>damalig</b> adj. waagaas, markaas, wakhigaas	<b>daneben</b> adv. agteed, barbarkeed, ku dhegan, ku naban, ku dhejisan
<b>damals</b> adv. berigaas, waagaas, markaas	<b>danebengehen</b> vi guldareysan, hongoobid
	<b>Dank</b> m -/ä-e mahad(da), mahadcelin(ta)



<b>dankbar</b> adj. mahad leh, mahadnaq, mahadcelin	<b>darstellen</b> vt soobandhigid, tilmaamid, ka hadlid
<b>Dankbarkeit</b> f  mahadnaq(a), mahadcelin(ta)	<b>Darstellung</b> f  soobandhigidd(da), tilmaamid(da), ka hadlid(da)
<b>danken</b> vt mahadnaqid, mahadcelin	<b>darüber</b> adv. kahor, ka kor
<b>dann</b> Konj. haddana, dabadeedna, markaana, adv. ka bacdi, ka dib	<b>darunter</b> adv. tass, ka hoos
<b>daran</b> adv. taas, kaas	<b>darum</b> adv. ku wareegsan, Konj.
<b>darauf</b> adv. tass, sidaas	sidaas daraadeed, maxaa
<b>daraus</b> adv. sidaas, halkaas	yeeley
<b>darf</b> Mod v ogolaan	<b>das</b> n (bestim. Art.), qodab (jamaad), taas,
<b>darin</b> adv. gudaha, dhexda	kaas
<b>Darlehen</b> n dayn(ka), amaah(da)	<b>Dasein</b> n jirid(da), joogid(da)
<b>Darm</b> m midhiqir(ka), xaymidhiqir(ta)	<b>dass</b> Konj. sidaas, sidaa

<b>dasselbe</b> Pron. kas oo kele, qudhiisa, isagoo kele	<b>debattieren</b> vi wada hadlid, shirid, xifaaltamid, ka hadlid
<b>Dattel</b> f -/n timir(ta)	<b>Debatte</b> f -/n
<b>Datum</b> n -/s taarikh(da)	wadahadal(ka), shir(ka), munaaqasho(da)
<b>dauern</b> vi wakhti qaadan, qaadir, qaadan	<b>Decke</b> f hu'(ga), buste(ha)
<b>dauernd</b> adj. jooto ah	<b>Deckel</b> f dabool(ka), fur(ka), aabudh(ka)
<b>Daumen</b> m suul(ka), Pl. suulasha	<b>decken</b> vt daboolid, goglid
<b>davon</b> adv. marka taas laga reebo, ka, taa	<b>defekt</b> adj. cilad leh, jaban, xun
<b>davor</b> adv. ka hor, ha horeyn	<b>Defekt</b> m -/e cilad(da), xumid(da), jabni(da)
<b>dazu</b> adv. intaas, waxa raaca	<b>defensiv</b> adj. difaac ah, iska caabi ah
<b>dazugehören</b> vi ka mid noqosho, ka mid noqon	<b>definieren</b> vt magacayn, qeexid, macneyn
<b>dazwischen</b> adv. halka dexe, u dhexeyn	

<b>Definition</b> f -/en	denkbar adj. la malayn
macno(ha), qeexid(da),	karo, lagu fekiri karo,
macneyn(ta)	malo ah
<b>Defizit</b> n -/e	denken vi fikirid,
khasaare(ha),	malayn
dhinaan(ta)	
<b>Degen</b> m seef(ta)	Denkmal n -/s
<b>deine (r, s)</b> Poss. Pron.	xasuus(ta), taallo(da)
taada, kaaga	denn Konj. maxaa
<b>Delegation</b> f -/en	yeelay, hadana
wafdi(ga)	dennoch Konj. ha
<b>Demokratie</b> f -/n	ahaatee, Hadana, laakiin
dimoqraadiyad(da)	der (bestim. Art.) m
<b>demokratisch</b> adj.	qodab, ka, kan
dimoqraadi ah	derselbe Pron. isago
<b>demolieren</b> vt burburin,	kale, la mid ah, sku mid
dudumin, baabiin	ah
<b>Demontage</b> f -/n	deshalb adv. sidaas
burburin(ta),	daraadeed, sidaa
dudumin(ta)	awgeed, sidaa darteed
<b>demütigen</b> vt yasid,	desto ad. sida daraadeed,
liidid, niyadjabin	sidaa awgeed, sidaa
	darteed

<b>deswegen</b> Konj. sidaa	<b>Dialog</b> m -/ö-e
daraadeed, sidaa	wadahadal(ka), hadal
awgeed, sidaa darteed	isku celin(ta)
<b>Detektiv</b> m -/e	<b>Diamant</b> m -/en
jaajuus(a), basaas(ka)	luul(ka), diyaaman(ka)
<b>deutlich</b> adj. cad, qeexan	<b>Diät</b> f-/en isdimid(da), is yareyn(ta) culeyska
<b>Deutsch</b> n af-jarmal(ka)	<b>dicht</b> adj. lingaxan, jiiq, dhag ah
<b>Deutscher</b> m jarmal(ka)	<b>dichten</b> vt gabyid, gabay tirin, suugaan tirin
<b>Deutsche</b> f jarmal(ka)	<b>Dichter</b> m gabayaa(ga), abwaan(ka), geeraare(aha), suugaanyhan(ka)
<b>Deutschland</b> n jarmal(ka)	<b>Dichtung</b> f-/en gabay(ga), geeraar(ka), suugaan(ta)
<b>Devise</b> f -/n lacag(ta) qalaad, lacag(ta) shisheeye. lacag(ta) adag	<b> dick</b> adj. buuran, cayilan, cayilsan, naaxsan
<b>Dezember</b> m diisamber (bisha 12aad)	
<b>Dialekt</b> m -/e af gobol(ka), af gobaleed(ka), lahjad(da)	

<b>Dickkopf</b> m maskax adeyg(ga)	<b>different</b> adj. kala duwan, kala jaad ah, kala nooc ah
<b>Dickmilch</b> f caano fadhi(ga)	<b>Differenz</b> f -/en kala duwanaan(ta), kala jaad(ka), kala
<b>die</b> (bestim. Art.) f qodob, kii, tii, dhii	<b>Dieb</b> m -/e tuug(ga) <b>Diebstahl</b> m -/ä-e xatooyo(da), tuugnimo(da)
<b>dienen</b> vi u adeegid, muteysan	<b>Dieb</b> m -/e tuug(ga) <b>Diebstahl</b> m -/ä-e xatooyo(da), tuugnimo(da)
<b>Diener/in</b> , m f adeege(ha), adeegto(da)	<b>Diktat</b> n -/ä-e yeedhis(ka)
<b>Dienst</b> m -/e howl(sha), shaqo(ada)	<b>Diktator</b> m -/en kaligii taliye(ha), diktaaroor(ka)
<b>Dienstag</b> m tallaado(da)	<b>Diktatur</b> f -/en kaligii taliyenimo(da)
<b>diese (es/er)</b> Pron. kan, tan	<b>diktieren</b> vt yeedhin, yeedhis
<b>diesmal</b> adv. markan, kolkhan	<b>Ding</b> m -/er wax(a), shey(ga)
	<b>Diplomat</b> m -/en siyaasi(ga), danjire(ha)

<b>Diplomatie</b> f	doch Konj. haa, bal
siyaasiyad(da)	
<b>dir</b> Pron. adiga, ku	<b>Docht</b> m -/ö-e
<b>direkt</b> adj. toos ah, quman	shumuc(a)
<b>Direktor</b> m	<b>Doktor</b> m -/en
maamule(ha), madax(a)	dhakhtar(ka), dabiibe(ha), daweeye(ha)
<b>Diskussion</b> f -/en	<b>Dolmetscher</b> m
dood(da), wadahadal(ka), munaaqashad(da)	afhayeen(ka), turjubaan(ka), af yaqaan(ka)
<b>diskutieren</b> vt, vi wada hadlid, doodid	<b>Donner</b> m onkod(ka), gugac(a)
<b>Distanz</b> m -/en	<b>donnern</b> vi onkodid
fogaan(ta), masaafo(da)	<b>Donnerstag</b> m
<b>distanzieren</b> vt ka	khamiis(ta)
fogaan, iska dheereyn	<b>doppelt</b> adj. labanlaab, labanlaaban
<b>distanziert</b> adj. ka	
fogaan ah, iska fogeyn	<b>Dorf</b> n -/ö-er tuulo(da)
<b>dividieren</b> vt u qeybin	<b>Dorn</b> m -/en qodax(da)
<b>Division</b> f –/en qeyb(ta), guuto(da)	<b>dornig</b> adj. qodax leh

<b>dort</b> adv. halkaas, meeshaas	<b>Drei</b> f seddex(da)
<b>Dose</b> f -/n koombo(da), daasad(da)	<b>Dreieck</b> n seddexgeesle(ha)
<b>Draht</b> m -/ä-e sillig(ga), waayir(ka), taar(ka)	<b>dreieckig</b> adj, seddexgeesle
<b>Drama</b> n -/s jilid(da), matalaad(da), dhacdo(da), masiibo(da). masaaib(ta)	<b>dreieinhalf</b> adj. seddex iyo badh
<b>drängen</b> vt dedejin, dirqin, kalifid, riixid	<b>dreifach</b> adj. seddexlaab
<b>draußen</b> adv. dibad ah, dibada, banaan ah	<b>dreihundert</b> num. seddex boqol
<b>Dreck</b> m -/es wasakh(da), usgag(ga), qudhun(ka)	<b>dreimal</b> adv. seddex jeer ah, seddex mar
<b>dreckig</b> adj. wasakhsan, usgag ah, qudhun ah	<b>dreißig</b> num. sodon
<b>drehen</b> vt wareegan, duubid, vi wareegsan	<b>dreizehn</b> num. seddex iyo tobantoban
<b>drei</b> num. seddex	<b>dringen</b> vi dedejin, dhakhsan
	<b>dringend</b> adj. degdeg ah, dhakhso ah
	<b>dritte (r, s)</b> num. seddexaaad



<b>Drittel</b> n seddex	<b>Drucker</b> m daabace(ha)
qaybood(ka)	<b>Druckerei</b> -/n f
<b>Droge</b> f -/n	madbacad(da)
mukhaadaraad(ka),	<b>du</b> Pers. Pron. adiga,
daroogo(da)	adi, aniga
<b>drohen</b> vi handadid,	<b>Duft</b> m -/ü-e caraf(ka),
hanjabid	ur(ta), udug(ga)
<b>Drohung</b> f -/en	<b>duftig</b> adj. udgoon,
handadaad(da),	carfoon
hanjabaad(da)	<b>dulden</b> vt dulqaadan,
<b>drosseln</b> vt ceejin, celin,	adkeysan
joojin	<b>Duldung</b> f adkeysi(ga),
<b>drüben</b> adv. halkaas,	dulqaad(ka)
dhankaas, dhinacaas	<b>dumm</b> adj. doqon ah,
<b>Druck</b> m -/ü-e	dabaal ah
daabicid(da), riixid(da),	<b>Dummheit</b> f -/en
cadaadis(ka),	doqonimo(da),
cadaadin(ta)	dabaal(ka),
<b>drucken</b> vt daabicid,	dabaalnimo(da)
cadaadin	<b>Düne</b> f -/n ciid(da)
<b>drücken</b> vt cadaadin,	kuusan, bataax(a),
riixid	bacaad(ka)



<b>düngen</b> vt bacrin, nafaqeyn	<b>durcheinander</b> adv. is dhex daadsan,
<b>Dünger</b> m nafaqo(da), bacrin(ta), nafqeyn(ta)	nidaamsaneyn, isku buuqsan
<b>dunkel</b> adj. madow ah, gudcur ah, mugdi ah	<b>durchfahren</b> vi dhexmarid, dhexjibaaxid
<b>Dunkelheit</b> f mugdi(ga), gudcur(ka). madow(ga)	<b>Durchfahrt</b> f dhexmarid(da), dhexmar(ka)
<b>dünn</b> adj. caato ah, weyd ah, dhuuban	<b>Durchfall</b> m shuban(ka), calool socod(ka), calool xanuun(ka), dhicid(da)
<b>durch</b> Prop. m Akk. dhex, ku	<b>durchfallen</b> vt ku dhicid, ku dhexdhicid
<b>durcharbeiten</b> vt shaqeyn badan, isgu bixin	<b>durchführen</b> vt hirgelin, qaban
<b>durchbeißen</b> vt dhexda ka qaniinid, dhexda ka goosan	<b>Durchführung</b> f hirgelin(ta), qabsho(da)
<b>durchblättern</b> vt rogrogid, daalacan	<b>durchgießen</b> vt ku dhexshubid
<b>durchbrechen</b> vt kala jabin, jabin, ka soobixid	



<b>durchgreifen</b> vi dib u hagaajin	<b>durchschauen</b> vi ka dhexfiirin, ka dhexeegid
<b>durchhalten</b> vi adkeysan, u adkeysan, dulqaadan	<b>Durchschnitt</b> m celcelis(ka), isku celcelis(ka), iskucelcelin(ta)
<b>durchhelfen</b> vi ka caawin, ka gargaarid	<b>durchschnittlich</b> adj. isku celcelis, marka
<b>durchirren</b> vt ku dhexlumid, ku dhexdhumid	la isku elceliyo
<b>durchkommen</b> vi ka reysan, ka gudbid	<b>durchsetzen</b> vt hirgelin, marin
<b>durchlassen</b> vt u ogolaan, dhexmarid	<b>durchsichtig</b> adj. wax laga dhex arki karo, khafiif ah, ka
<b>durchlesen</b> vt wada akhrin	dhexmuuda
<b>durchreißen</b> vt jeexjeexid, jarjarid	<b>durchstreichen</b> vt xarxariiqid, masaxid(da)
<b>Durchsage</b> f dhawaaqid(da), kor u dhawwaqid(da)	<b>durchsuchen</b> vt ka dhexbaadhid, ka dhexbaadhis
	<b>dürfen</b> vi awoodid, karid

<b>Dürre</b> f -/n abaar(ta)	duschen vi maydhan,
<b>Durst</b> m -/ü-e oon(ka), haraad(ka)	qubeysan, qabeysan
<b>Dusche</b> f -/n qubeys(ka), meydhasho(da)	Dutzend n -/e dersin(ka)
	<b>Dynamit</b> n -/s qalab(ka) qarax(a)

## E

<b>Ebbe</b> f-/n caari(ga) adda	<b>Echo</b> n -/s jabaq(da),
<b>eben</b> adj. siman, hadda, imika	dayaan(ka), qaylo(da)
<b>Ebene</b> f -/n ban(ka), banaan(ka)	dhawaaq(a), sanqadh(a)
<b>ebenfalls</b> adv. sidoo kele, xataa	<b>echt</b> adj. asal ah, run ah, dhab ah
<b>ebenso</b> adv. sidoo kale	<b>Echtheit</b> f -/en dhab(ta),
<b>Eber</b> m -/n doofaar(ka)	asal(ka)
	<b>Ecke</b> f -/n gees(ka),
	rukun(ka)



<b>eckig</b> adj. geesoole ah	<b>ehemals</b> adv. kolhore, marhore
<b>egal</b> adj. adv. isku mid ah, waxba igama gelin	<b>Ehemann</b> m say(ga), nin(ka), abaanware(ha)
<b>egalisieren</b> vt isku mid ka dhigid	<b>Ehepaar</b> n xaas(ka), qoys(ka)
<b>Egoismus</b> m isku roonaan(ta), isla qabweyn(ka), iscajabin(ta)	<b>ehler</b> adv. marhore, in ka badan
<b>egoistisch</b> adj. isku roon, isla weyn, iscajabin	<b>Ehescheidung</b> f -/en furid(da), furid(ta)
<b>ehe</b> Konj. ka hor	kala tegid(da), furitaan(ka)
<b>Ehe</b> f -/n guur(ka), qoys(ka)	<b>Ehre</b> f -/n sharaf(ta), amaan(ta)
<b>Ehefrau</b> f afo(da), naag(ta), xaas(ka)	<b>ehren</b> vt sharfid, amaanid, maamuusid
<b>Ehelosigkeit</b> f doobnimo(da), xaas la'aan(ta)	<b>Ehrgeiz</b> m dadaal(ka), karti(da), hanweyni(da), hufnaan(ta)
<b>ehemalig</b> adj. kolhore, marhore	<b>ehrgeizig</b> adj. dadaal badan, karti leh, hanweyn leh

<b>ehrlich</b> adj. daacad ah, quman, aamin ah	<b>Eigenart</b> f gaarahaan(ta)
<b>Ehrlichkeit</b> f daacad(da), sharaf(ta)	<b>eigenartig</b> adj. u gaar ah, u gooni ah
<b>Ehrlosigkeit</b> f daacad la'aan(ta), sharaf la'aan(ta)	<b>Eigenname</b> m magac(a) qof(ka)
<b>ehrlos</b> adj. daacad la'aan, sharaf la'aan	<b>Eigenschaft</b> f-/en qaab(ka), sife(ha), caado(da), tayo(da)
<b>Ehrung</b> f -/en sharaf(ta), abbalmarin(ta)	<b>Eigensinn</b> f madaxadeeg(ga)
<b>Ei</b> n ukun(ta), ugax(da), beed(ka)	<b>eigentlich</b> adv. dhab ahaantii; run ahaatii dhabitii, runtii, xiqiiqdii
<b>Eid</b> m -/e dhaar(ta), run(ta)	<b>Eigentum</b> n -/s hanti(da), maal(ka)
<b>Eierkuchen</b> m canjeero(ada), laxoox(da), kimis(ta)	<b>eignen</b> vi ku habon, vr ku fiican
<b>Eifersucht</b> f maseyr(ka), hinaas(ka), hinaase(ha)	<b>Eilbrief</b> m warqad(da) degdeg ah
<b>eigen</b> adv. u gaar ah, u gooni ah	<b>Eile</b> f degdeg(ga), dhakhso(ha)

<b>eilen</b> vi dedejin, dhakhsan, vr degdegid,	<b>Einbildung</b> f -/en isku maleyn(ta), isla
<b>eilig</b> adj. degdegsan, dhakhsan	weynaan(ta), isu qabid(da)
<b>Eimer</b> m baaldi(ga)	<b>einbrechen</b> vt jabin, vi jabsan
<b>eine (r, s)</b> unbestim. Art. mid, hal	<b>Einbrecher</b> m tuug(ga)
<b>einander</b> adv. midba, mid kale, is wada	<b>Einbruch</b> m xatooyo(da), jabsad(ka), jabsasho(da)
<b>Einbau</b> m dhisid(da)	<b>eindeutig</b> adj. si muuqata ama cad, waadix ah
<b>einbauen</b> vt ku dhisid	<b>einberufen</b> vt xoog ku soo gelid, khasab
<b>einberufen</b> vt isgu yeedhid	<b>einberufung</b> f isgu yeedhid(da), isku imaansho(da), isku imasho(da)
<b>Einberufung</b> f isgu yeedhid(da), isku imaansho(da), isku imasho(da)	<b>einbringen</b> vi ku kusoo gelid
<b>einbeziehen</b> vt ku darid, ugeyn	<b>Eindruck</b> m -/ü-e fikrad(da), ra'yi(ga), aragti(da)
<b>einbilden</b> vi ismaleyn, ku riyon, isku qabid	<b>eineinhalb</b> num. hal iyo badh, hal iyo bar



<b>einengen</b> vt cidhiidhi ka dhigid	<b>einfarbig</b> adj. hal midab leh
<b>einerlei</b> adj. isku mid ah	<b>Einfluss</b> m saamayn(ta), soojiidasho(da)
<b>einfach</b> adj. sahlan, dhibyar, jilicsan, fudeyd ah	<b>eingefrieren</b> vt qaboojin, barafeyn
<b>Einfachheit</b> f dhibyaraan(ta), sahal(ka)	<b>einfügen</b> vt ku darid, vr ku biirid
<b>einfahren</b> vt ka soogelid	<b>Einfuhr</b> f -/en soodejin(ta), keenid(da)
<b>Einfahrt</b> f meesha ama albaab(ka) baabuur(ta), gelid(da)	<b>einführen</b> vt soodejin, keenid
<b>Einfall</b> m ku soodhicid(da), soodhicid(da)	<b>einfüllen</b> vt ka buuxin, buuxdhaafin
<b>einfallen</b> vt ku soodhicid	<b>Eingang</b> m meel(sha) laga galo, albaab(ka), irrid(da)
<b>einfällig</b> adj. doqon ah, dabaal ah, nacas ah	<b>eingeben</b> vt siin, u faanid
<b>einfangen</b> vt qaban, tudhsiiin	<b>eingebildet</b> adj. kibir badan, tallo badan, waxbartey
<b>einfärben</b> vt midabeyn, midab marin	

<b>ingegeben</b> vi dhiman, vt u gudagelid, baabi' id	<b>Einheit</b> f -/n midnimo(da)
<b>Eingeweide</b> n dibaddaaqid(da)	<b>einige (r, s)</b> Pron. qaar, xoogaa, in
<b>eingießen</b> ku shubid, buuxin	<b>einigen</b> vt isku raacid, midayn
<b>eingliedern</b> vt ku darid, nidaamin, isku habeyn, hagaajin	<b>einigermaßen</b> adv. xoogaa, inta badan
<b>eingraben</b> vt ku duugid, ku xabaalid, ku duugan	<b>Einigkeit</b> f midnimo(a)
<b>eingreifen</b> vi kala dhexgelid, kala joojin, kala celin	<b>Einigung</b> f midnimo(da)
<b>einhalten</b> vt fulin, vi hakan, u hakan, ku joojin	<b>Einkauf</b> m soogadasho(da), iibsasho(da), sooadeegasho(da)
<b>einheimisch</b> adj. wadani ah	<b>einkaufen</b> vi vt sooiibsan, soogadan sooadeegan
<b>Einheimische (r)</b> f/m wadaniyad(da), wadani(ga)	<b>einklagen</b> vt ku eedeyn, dacweyn
	<b>einklammern</b> vt hormogelin

<b>Einkommen</b> n	<b>Einnahme</b> f dakhli(ga), waxa kusoo gala,
mushar(ka), dakhli(ga)	faa'iido(da)
<b>einladen</b> vt martiqaadid, casuumid	<b>einnehmen</b> vt qaadan, soogelid
<b>Einladung</b> f	<b>einordnen</b> vt isku
casuumad(da), martiqaad(ka)	nadaamin, hagaajin
<b>Einleitung</b> f hordhac(a)	<b>einpacken</b> vt xidhxidhid
<b>einleuchtend</b> adj. muuqda, cad, iftiin ah	<b>einpflanzen</b> vt ku beerid
<b>einliefern</b> vt u dirid, u geyn	<b>einplanen</b> vt qorsheyn
<b>einmal</b> halmar, marqudha, markeliya	<b>einrichten</b> vt yagleelid, nidaamin, hagaajin
<b>Einmarsch</b> m gelid(da), qabsasho(da)	<b>Einrichtung</b> f
<b>einmarschieren</b> vt dhexgelid, qabsan	hagaajin(ta), nidaamin(ta)
<b>einmischen</b> vt isku qasbid, faragelin, qasbid	<b>eins</b> num. kow, hal, mid
<b>Einmischung</b> f isku qasbid(da), faragelin(ta)	<b>einsam</b> adj. keli ah, gooni ah, cidlo ah
	<b>Einsamkeit</b> f -/en keli(da), cidlo(da)



<b>einsammeln</b> vt	<b>Einschränkung</b> f -/en
sooururin, iska keenid	xadidid(da), xadeyn(ta)
<b>einschalten</b> vt shidid,	<b>Einschreibbrief</b> m -/e
kicin, shaqaysiin,	warqad(da) balansan
daarid	
<b>einschätzen</b> vt ku	<b>einschreiben</b> vt ku qorid
qiyaasid, u maleyn	
<b>einschenken</b> vt ku	<b>einschütten</b> vt ku shubid
hadiyeen, siin	
<b>einschicken</b> vt u dirid	<b>einsehen</b> vt arkid, u
	garan
<b>einschieben</b> vt ku riixid,	<b>einseitig</b> adv. hal dhinac,
dhexgelin	dhinac keli ah
<b>einschlafen</b> vi gami'd,	<b>einsenden</b> vt u dirid
seexan, hurdid	
<b>einschließen</b> vt ku	<b>Einsender</b> m dire(ha)
xidhid, ku qufulid	
<b>einschließlich</b> adj.	<b>einsenken</b> vt dhexgelin,
marka lagu daro, ku dar	dhexqusid
<b>einschneiden</b> vt ka jarid,	
ka goyn	<b>einsetzen</b> vt ku qorid, ku
	darid, vi bilaabid
<b>einschränken</b> vt	<b>einsperren</b> vt ku xidhid,
xadidid, xadeyn	xabisid
	<b>Einspruch</b> m
	dacwad(da), dood(da)
	<b>einst</b> adv. waagii hore,
	marhore, wakhti hore

<b>einsteigen</b> vt fuulid, korid	<b>eintragen</b> vt ku qorid
<b>einstellen</b> vt demin, joojin, qorid	<b>eintreffen</b> vi iman, ku iman, dhicid
<b>Einstellungstest</b> m -/e tijaabo(da), imtixaan(ka)	<b>eintreten</b> vi gelid, ku biirid
<b>einstimmig</b> adj. la isku raacay	<b>Eintritt</b> m galitaan(ka), gelid(da), dhexgelid(da)
<b>Einstimmigkeit</b> f isku raacid(da), ogolaan(ta)	<b>eintrocknen</b> vt qalajin, vi qalalin, engejin
<b>einströmen</b> vt ku qulqulid, ku durdurid	<b>einverstanden</b> adv. ku raacsan, ogolaan, waayahay
<b>Einsturz</b> m dumid(da), baabiin(ta)	<b>Einverständnis</b> n ogolaan(ta), ku raacitaan(ka)
<b>eintauchen</b> vt quusid, muuidid	<b>einverstanden sein</b> vi ku raacsan
<b>eintauschen</b> vt ku beddelan	<b>Einwand</b> m -/ä-e dood
<b>eintausend</b> num. kun	ka qaadid(da),
<b>einteilen</b> vt u qeybin	ka soohorjeedid(da)
<b>Einteilung</b> f u qeybin(ta)	

<b>Einwanderer</b> m		<b>Einwilligung</b> f -/en
soogalooti(ga),		ku raacid(da), ogolaan(ta)
soogale(ha),		<b>einwohnen</b> vr
soohaajire(ha)		ku noolaan, degenaan
<b>einwandern</b> vi	soogelid,	<b>Einwohner</b> m
u haajirid		ku noole(ha), degene(ha)
<b>Einwanderung</b> f		<b>Einwohnermeldeamt</b> n
soogalooti(ga),		-/ä-e xafiis(ka)
u haajirid(da)		diiwaangelin(ta)
<b>einwechseln</b> vt u		dadweynaha
beddelan		<b>Einwurf</b> m
<b>einweichen</b> vt ku	goyn,	ku tuurid(da), tuuryo(da)
goyn		<b>einwurzeln</b> vi
<b>einweihen</b> vt uga		ku xidideysan, xidideysan
sheekeyn, uga waramid,		<b>Einzahl</b> n
ku qarsan		keli(ga)
<b>einweisen</b> vt u	dirid,	<b>einzahlen</b> vt
geyn, dhigid		dhiibid,
<b>einwerfen</b> vt ku	tuurid,	bixin
ku dhextuurid		<b>Einzel</b> n
<b>einwilligen</b> vt ku	raacid,	kali(da)
ogolaan, yeelid		<b>Einzelheit</b> f
		mid
		mid(ka), halhal(ka),
		tafatir(ka), kali(da)



<b>einzeln</b> adj. keli ah, mid ah, mid qudha ah	<b>Eitelkeit</b> f -/en is qurxin(ta), is dhis(ka)
<b>einziehen</b> vt gelin, ka bixin, vi soodegid	<b>Eiter</b> m malax(da), dheecaan(ka)
<b>Einzelzimmer</b> n qol(ka), makhsin(ka)	<b>eitern</b> vi malaxaysan, dheecaameyn
<b>einzig</b> adj. keli ah, madi ah	<b>Eiweiß</b> n ukun(ta), dux(da), brotin(ta)
<b>einzigartig</b> adj. nooc la mid ah jirin, keli ah	<b>Elefant</b> m -/en maroodi(ga)
<b>Einzug</b> m soodegid(da), soogelid(da)	<b>elegant</b> adj. dhisan, xaragoon
<b>Eis</b> n baraf(ka)	<b>Eleganz</b> f dhisnaan(ta), xarago(da)
<b>Eisen</b> n bir(ta), xadiid(ka)	<b>elektrisch</b> adj. tamar leh, nal leh
<b>eisig</b> adj. baraf ah, qabow ah	<b>Elektrizität</b> f tamar(ta), koronto(da), nal(ka)
<b>eiskalt</b> adj. qabow ah, baraf ah	<b>Elektrotechnik</b> f cilmiga koronto(da), farsamo(da), korontada ama tamar(ta)
<b>eitel</b> adj. is qurxin, is dhis	

<b>Element</b> n -/e	<b>Ellenbogen</b> m suxul(ka)
walax(da), curiye(ha)	
<b>elementar</b> adj. bilow ah	<b>Eltern</b> f waalid(ka)
<b>elend</b> adj. dhibaateysan, baaba'san	<b>Emanzipation</b> f-/en dhaqdhqaqq(a), issxoreyn(ta) haween(ka)
